

<p>HJÄLPMEDEL DALARNA Dalarnas kommuner och Region Dalarna</p>	Kommentar till Lånevillkor Faallooyin ku aadan shuruudaha amaahda	Reference number LD16/01946
	Magaca dokumentiga Faallooyin ku aadan shuruudaha amaahda	Version 9 Nr bogga 1(3)
	Waxaa soo saaray Annelie Haglind, Linus Nielsen	Waxaa la go'aamiyay 2016-05-26
		Waxaa aqbalay oo xaqiijiyay Guddiga caawinadda qalabka ee Dalarna
		Ah ansax laga bilaabo 2020-05-14

Qalabka fududeeya hawsha waa amaah

Qalabka lagu amaahinayo waxaa leh xarunta qalabka hawsha fududeedaya ee maamulka caafimaadka gobolka. Qalabka waxaa loo qoray oo loo go'aamiyay adiga kaligaa. Sidaa daraadeed ayaa laguugu ogolayn in aad amaah ku bixiso, gado mise si kaleba ku bixiso qalabkan.

U isticmaal qalabka sida warbixinta laguugu faray

Tilmaan sheegaysa sida loo isticmaalo qalabka ayaa inta badan la soo raacsiiyaa qalabada hawsha fududeeya badankood. Aqri oo dhex mar tilmaanta, raacna sida ay ku farayso.

Ma'ahan in aad wax ka badasho ama dib u shisto qalabka hawsha fududeeya. Haddii aad u isticmaasho qalabka si ka duwan sida warbixinta laguugu faray, waxaad adiga ama qofka mas'uuliyaddaa sharci ee carruur hayo mas'uul aad ka noqonaysaa wixi qalabkaas soo gaara.

Go'aamiyaha, qofka kuu qoray qalabka, waxa uu xaq u leeyahay in uu sameeyo qiimayn cusub oo ku aadan baahidaada dhanka qalabkan, tusaale ahaan haddii karaankaaga ama awoodaada shaqo mise habka aad maanta u deggantahay ay isbadalaan mise hadii aadan u isticmaalin qalabka sida loogu talogalay. Qiimayn cusub oo uu sameeyo qofka kuu qoray qalabka waxay ka dhigantaa in lagaa beddelo ama dib lagaaga celiyo qalabka gebi ahaanba.

U isticmaal qalabka si wanaagsan si uusan u duugoobin si ka dhaafsan sida caadiga ah

Si qalabka si wanaagsan kuugu shaqeeyo waa in aad nadiifisaa si joogta ahna uga war haysaa. Waxaa kaloo muhiim ah in aad ku fikirtaa ku xifdinta qalabka meel wanaagsan.

Waxyaabaha yaryarootiga ah ee loo gato qalabada si ay u shaqeeyaan, adiga ayaa shaqsi ahaan baxsanaya qarashkooda, tusaale ahaan batariga taayirka iyo tubada loogu tala galay kursiga curyaanka. Waxaa intaas ku sii darsami karo qarashaad khidmo.

Xannaanee qalabka oo yuusan kaa lumin

Marki qalab uu lumo, la xado ama la waayo taxaddar la'aan awgeed waxaad ku khasbanaan kartaa in aad bixiso magdhaw. Qalabka caawinaada ee hawsha fududeeya marki laga ee dhinaca caymiska waxaa loo arkaa hantida guurtida oo loo isticmaalo si gaar ah. Sidaa daraadeed waxaa lagula talinaayaa in aad dib u eegto caymiskaaga.

Inta qarash ee aad bixinayso waxay ku xirantahay qalabka uu yahay. Waraaq qaansheegasho ah ayaa laguu soo dirsanaayaa markasta, adiga shakhsii ahaan ayaa iskala heshiinaaya shirkadda caymiska ama shirkadda wax raridda. Heshiis amaah ayaa kala saxiixanaysaan adiga (amaah qaate) iyo daryeelka caafimaadka ee gobolka ama degmada. Sidaa daraadeed ayaa waraaqda qaansheegashada kaligaa laguugu soo diraayaa.

 <p>HJÄLPMEDEL DALARNA Dalarnas kommuner och Region Dalarna</p>	Kommentar till Lånevillkor Faallooyin ku aadan shuruudaha amaahda	Reference number LD16/01946
	Magaca dokumentiga Faallooyin ku aadan shuruudaha amaahda	Version 9 Nr bogga 1(3)
	Waxaa soo saaray Annelie Haglind, Linus Nielsen	Waxaa la go'aamiyay 2016-05-26

Waxaa aqbalay oo xaqiijiyay Guddiga caawinadda qalabka ee Dalarna	Ah ansax laga bilaabo 2020-05-14
---	-------------------------------------

Siyaabaha loo sameeyo wargelinta

- Haddii qalabka la lumiyo, la xado ama si kale aad u weydo waa in aad sida ugu dhaqsiyaha badan u wargelisaa shirkadda caymiskaaga. Haddi qalabka wax dhaawac ah uu ku soo gaaro rarka gudhiisa waa in aad wargelisaa shirkadda ka mas'uul ah rarka.
- Haddii qalabka wax uu ku soo gaaro adigoo diyaarad ku safraaya waa in isla markaa isla meeshaa aad wargelisaa shirkadda diyaaradda ee aad ku safartay. Haddiise lagaa xado qalabka waxaad uga ashtakoonaysaa oo aad wargelinaysaa booliska kadibna waxaad kale oo aad wargelinaysaa shirkaddaada caymiska.
- La xiriir daryeelka caafimaad ee gobolka mise kan degmada kaas oo aad xiriirka kula lahaan jirtay qalabka awgiis. Uga sheekhee ayaga sida ay u dheceen!

Haddii qalabka uu kuu shaqayn waayo

Marki aad amaahsanayso qalab waxaa lays siiyaa warbixin ku aadan halka aad la xiriireyso haddii qalabka kuu shaqayn waayo. Inta aadan gaynin qalabka meel lagu hagaayi waa in uu qalabku ugu horayn ahaadaa mid nadiif ah. Haddii qalabku nadiif ahayn wadaad bixinaysaa khidmada nadaafinta.

Haddii aad ku sugantahay meel ka baxsan Dalarna, Iswiidhan mise dibadda aad joogto qalabkana kaa cilladaysanyahay oo uu u baahanyahay hagaajin waa in hagaajintaas ay soo aqbalaan maamulka caafimaadka gobolka ee qalabka hawsha fududeeya. Fadlan wax lambarkooda +46243–49 78 70 mise u dir email hjalpmedelscenter@regiondalarna.se

Haddii qalabka sameenaayo dibedda qarashkiisa adiga ayaa la baxaya. Haddiise aad qalabka u soo dirayso Iswiidhan si laguugu hagaajiyo waxaad la baxaysaa soo diridda oo kaliya.

Haddii aad guurayso

Waqtii wanaagsan waa in aad u soo sheegtaa xarunta aad xiriirka kula lahaan jirtay qalabka awgiis haddii aad guurayso mise degmada aad beddelanayso. Waxaa markaas ogaanaysaa haddii laguu oggolaanaayo inaad qalabka hore u qaadataa mise in kale.

Qalabada intooda badan lama oggola in hore loo qaato kolka la guurayo waayo waxaa leh maamulka caafimaadka gobolka Dalarna mise degmada ku taal Dalarna.

Dib u celi qalabka

Adiga shakhsii ahaan mise adigoo adeegsanayo qof kale ayaa waxaad qalabka dib ugu celinaysaa halka adiga iyo amaah bixiyuhu isku afgarateen.

- Marki muddada amaahda ay dhamaato
- Haddii aadan u baahnayn qalabka
- Haddii xarunta kaa codsato in aad dib u soo celiso qalabka

Qalabka kolka aad dib u soo celinayso waa in uu ahaadaa mid nadiif ah.

Maamulka caafimaadka gobolka ayaga ayaa si gaar ah u soo doonanayo qalabka mar haddii uu yahay mid boos weyn qaadanayo, tusaale ahaan sarriiro, dallace mise kursiga curyaanka midka dabka korontada ku shaqeeeya.

<p>HJÄLPMEDEL DALARNA Dalarnas kommuner och Region Dalarna</p>	Kommentar till Lånevillkor Faallooyin ku aadan shuruudaha amaahda	Reference number LD16/01946
	Magaca dokumentiga Faallooyin ku aadan shuruudaha amaahda	Version Nr bogga 9 1(3)
	Waxaa soo saaray Annelie Haglind, Linus Nielsen	Waxaa aqbalay oo xaqiijiyay Guddiga caawinadda qalabka ee Dalarna

Intaa wixii dhaafsiisan adiga shakhsii ahaan ayaa dib u soo celinaya. Haddiise aad u baahantahay in laguugu caawiyoo xumuulka qalabka waxaad la xiriiraysaa xarunta qalabka. Adiga ayaa kolkaa khidmada bixinaya. Lambarkooda waa 0243 – 49 78 70.

Magdhaw ayaad ku khasbanaan kartaa inaad bixiso haddii

- qalabka loo nadiifin sida warbixinta laguugu faray mise tilmaanta
- qalabka dhaawac ka baxsan duugoobid soo gaaro
- aad lumiso qalabka taxaddar la'aan awgees
- qalabka dib loo soo celin waayo kolka uu amaah bixiyuhu kaa codsaday kadib